# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. ~~JSL/M/XERM/249-406~~/062004

DATE ~~24/06/04~~

# DECREETO MADAXWEYNE NO: 030/062004

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.**

**Markuu helay:** Go'aankii GW ee Lr: GW/KF-21/321/2004 ee 05/05/2004 uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyay Xeerka Qareenada (Xeer N0: 30/2004).

**Markuu arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo saarayaa**

**Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Xeerka Qareenada Xeer No: 30/2004.**

***Waxaana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.***

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweyne

Jamhuuriyadda Somaliland
GOLAHA WAKIILADA

# Xeerka Qareenada (Xeer No. 30/2004)

Hargeysa, January 28, 2004

Jamhuuriyada Somaliland

**GOLAHA WAKIILADA**

*Xarunta, Hargeysa*

Republic of Somaliland

**HOUSE OF REPRESENTATIVES**

*HQ, Hargeisa*

*Our ref:* GW/Kf-21/ 321 /2004

*Date:* 28/01/2004

## GO'AAN ANSIXIN XEERKA QAREENADA (Xeer No. 30/2004)

### GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu Arkay:** qodobada 27aad iyo 28aad ee Dastuurka oo ku saabsan xuquuqda aasaasiga ah ee dacwadda iyo is-difaaca iyo xuquuqda gaarka ah ee uu leeyahay qofka xorriyadda laga qaaday.

**Markuu Dareemay:** baahida loo qabo xeer hufan oo muwaadiniinta ku kaalmeeya gudashada xuquuqdooda dacwadda iyo is-difaaca, laguna maamulo gar-yaqaanada mihnadaas ku xoogsada.

**Markuu Dhagaystay:** talooyinka ururada Qareenada, garyaqaanada madaxa-banaan iyo Wasiirka iyo masuuliinta Wasaaradda Cadaaladda ee mashruuc-sharcigan la xidhiidha.

**Markuu Darsay:** si qoto-dheerna uga baaraandegay nuxurka mashruuc-sharcigan, asagoo maanka ku hayay xuquuqaha Dastuurku u asteeyay muwaadiniinta, qareenada iyo curfiga caalamiga ah ee mihnada qareenimada.

**Markuu u Codeeyay:** ansixinta Xeerka Qareenada, fadhigii 28/01/2004 oo ay goob-joog ahaayeen 47 Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.

## Wuxuu

**Cod aqlabiyad ah (30 cod) oo gacan taag ah ku ansixiyey XEERKA QAREENADA (Xeer No. 30/2004). Halka ay ka diideen 6 Mudane, 10 Mudane oo kalena ka aamuseen, Gudoomiyuhuna aanu codayn, sida u caadada ahayd.**

Allah Mahad leh,

**Maxamed Xuseen Cisman**
Xoghayaha Guud, G/Wakiilada

**Axmed Maxamed Adan**
Gudoomiyaha G/Wakiilada

## Golaha Wakiilada JSL

**Markuu Arkay:** qodobka 27aad iyo 28aad ee Dastuurka JSL.

**Markuu Darsay:** mashruuc-sharciga Qareenada ee Xukuumaddu u soo gudbisay.

**Markuu Ku Qancay:** baahidda loo qabo xeer lagu maamulo qareenada iyo mihnadooda.

**Markuu tixgeliyay:** soo jeedimaha iyo talooyinka uruka qareenada iyo Wasaaradda Cadaaladda.

**Wuxuu soo saaray Xeerkan:**

## QAYBTA 1AAD

### Qodobka Iaad
### Qeexid

**"Markamad"**Waxaa loola jeedaa Maxkamada caadiga ah & Maxkamada Ciidamada ee JSL.
**"Maxkamadaha Hoose"**Waxaa loola jeedaa Maxkamadaha Degmooyinka Gobolada& Racfaanka
**"Maxakamada Sare"**Waxaa loola jeeda Maxkamada Sare ee JSL.
**"Wasaaradda"**Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Cadaaladda
**"Wasiirka"**Waxaa loola jeedaa Wasiirka Cadaaladda
**"Qareen"**Waxaa loola jeedaa Garyaqaanka ka diiwaangashan Wasaaradda Cadaaladda oo ku shaqeysta Mihnada Qareenimada.
**"Mihnad Qareenimo"**Waxaa loola jeedaa ku shaqeysiga Aqoonta shrci, Nidaaminta habeynta iyo ku doodista arrimaha sharciga.
**"Igmade"**Waxaa loola jeedaa qofka u igmanayaa Qareen inuu u fuliyo hawl sharciyeed
**"Qof"**Waxaa loola jeedaa cid kasta oo leh qofnimo Dabiiciya ama qofnimo qaanuuniya
**"Diiwaan Qareen"**Waxaa loola jeedaa diiwaanadda lagu qoro laguna kaydiyo Magacyada & arrimaha la xidhiidha ee qareenada Ruqsada Ka haysta Wasaaradda Cadaalad
**"Ruqsad"** Waxaa loola jeeda Xeerka Wasiirka Wasaaradda Cadaaladu Ku soo saaro ogolaanshaha ku shaqeysiga mihnada qareenimo
**"Guddi"**Waxaa loola jeedaa Guddiga ruqsad bixinta iyo anshaxmarinta qareenada ee xeerkani tilmaamayo.
**"Laalis"** Waxaa loola jeedaa in la tirtiro ku shaqeysiga ruqsada qareenimo gebi ahaanba.
**"Hakin"**Waxaa loola jeedaa in ruqsada qareenimo wakhti cayiman laga joojiyo qareenka ku shaqeysigeeda.
**"Urur"**waxa loola jeedaa uruka qareenada ee ay samaystaan muwaadiniinta ku shaqaysta mihnadda qareenimo, si waafaqsan xeerkan.

## Qaybta Ilaad.

## RUQSADA IYO DIIWAANGELINTA QAREENADDA

### Qodobka 2aad.

1. Qofna kuma shaqeysan karo mihnad Qareenimo isagoon Ruqsad ka haysan Guddiga ruqsad bixinta & anshax marinta qareenada ee xeerkani tilmaamyo.
2. Qofna lama siin karo ruqsad qareenimo, haddii uu ka tirsan yahay golayaasha qaranka (Guurtida, Wasiirada & Wakiilada), golayaasha degaanada, shaqaalaha dawladda & ciidamada.

### Qodobka 3aad

3 Qofka codsanaya ruqsad Qareenimo,wuxuu codsigiisa ku soo hagaajinayaa Guddiga ruqsad bixinta & anshax marinta, isagoo ku soo lifaaqaya cadeymaha xirfadiisa aqooneed, ee ku xusan qodobka 6aad, 7aad, 8aad, ee xeerkan.

4 Codsaduhu waa inuu bixiyaa khidmada isu-diiwaangelinta Imtixaanka qareeenimada.

5 Haddii Guddigu ku qanacdo in codsaduhu buuxinayo shuruudaha waxay ka qaadanayaan imtixaan la xidhiidha mihnada qareenimo muddo 21 cisho gudahood ah, waxayna natiijada imtixaanka ugu gudbinayaan Wasiirka cadaaladda muddo 7 cisho gudahood ah.

6 Haddiise Guddigu aragto inaanu buuxinayn codsaduhu shuruudaha imtixaanka waxaa loo celinayaa codsigiisa.

### Qodobka 4aad

1. Hadii codsaduhu ku dhaco imtixaanka guddiga, codsi labaad ma soo qoran karo mudo hal sano ah, khidmadii isu diiwaangelinta imtixaankana looma celonayo.
2. Wasiirka Wasaaradda Cadàaladdu markuu helo natiijada Imrixaanka wuxuu ku soo saarayaa ogolaanshaha ruqsada qareenimo Xeer Wasiir ugu badnaan 14 cisho gudahood
3. Qareenka waxaa ku waajib ah inuu bixinayo cashuurta ruqsada qareenimada (issuance of license fee) iyo cashuuraha kale ee xeer ku waajibiyay, waxana la gelinayaa diiwaanka qareenada.

### Qodobka 5aad

### NOOCYADDA RUQSADAHA QAREENIMADA

ruqsadaha qareenimadu waxay u qaybsamayaan sadex nooc oo kala ah:

1. Ruqsada Qareen Guud.
2. Ruqsada Qareen Ciqaabeed.
3. Ruqsada Qareen Shareeco.

### Qodobka 6aad

### RUQSADA QAREEN GUUD

Ruqsada Qareen Guud waxaa la siinayaa qofka buuxiya shuruudahan:-

a. Waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay.
b. Waa inaan dadiisu 25 sano ka yareyn.
c. Waa inuu Maskaxda ka fayow yahay.
d. Waa inaanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo kama dambays ah oo maxkamad horteed kaga cadaaday shantii sanno ee u dambaysay.

e. Waa inuu haystaa shahaado Jaamacadeed amamachad sharci oo dalka lafa aqoon san yahay ama waa inuu Garsoore kaga soo shaqeeyay Maxkamad Gobol, Racfaan ama Maxkamad Sare muddo aan ka yareyn shan sano
f. Waa inuu ka gudbaa Imtixaanka guddiga

olaha Xoghayaha akiilad

## Qodobka 7aad
## RUQSADA QAREEN CIQAABEED.

Ruqsada qareen dacwad ciqaabeed waxaa la siinayaa qofka buuxiya shuruudahan:-

a. Waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay.
b. Waa inaan dadiisu 25sano ka yareyn.
c. Waa inuu Maskaxda ka fayow yahay.
d. Waa inaanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo kama dambays ah oo maxkamad horteed kaga cadaaday shantii sanno ee u dambeeyay.
e. Waa inuu ku soo shaqeeyay Xeer Ilaaliye, Doode ama Garsoore, Maxkamad Ciidan muddo aan ka yareyn 5 sano.
f. Waa inuu ka gudbaa imtixaanka gudduga.

## Qodobka 8aad
## RUQSAD QAREEN SHAREECO

Ruqsad Qareen Shareeco waxaa la siinayaa qofka buuxiya shuruudahan:-

a. Waa inuu yahay muwaadin u dhashay Somaliland.
b. Waa in aan da'diisu ka yareyn 25 sano.
c. Waa inuu maskaxda ka fayaw yahay.
d. Waa in aanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo kama dambays ah oo maxkamad horteed kaga cadaaday shantii sanno ee u dambaysay.
e. Waa inuu haystaa shahaado jaamacad shareeco oo la aqoonsan yahay ama aqoon u dhiganta ama ku soo shaqeeyay garsoore Maxkamad Degmo.
f. Waa inuu ka gudbaa imtixaanka guddiga.

## Qodobka 9aad

Garyaqaanka haysta shadaado jaamacadeed ee sharci kuna soo shaqeeyay muddo aan ka yareynshan sano Xeer Ilaaliye Guud, Garsoore Maxkamad Sare, Maxkamad Racfaan, ama Bare Jaamacad sharci ee soo codsada mihnada Qareenimoo loogama baahna inuu galo imtixaanka ku xusan qodobka 4aad ee xeerkan, waxaana toos loo siinayaa ruqsad qareen guud.

## Qodobka 10aad
## XADKA RUQSADAHA QAREENADA

1. Qareen guud waxaa u banaan inuu galo dhamaan dacwadaha kala duwan ee darajo kasta oo maxkmadeed.
2. Qareen Ciqaaneed, wuxuu gali kara dacwadaha ciqaabta ee dhamaan darejooyinka Maxkamadaha.
3. Qareen Shareeco, wuxuu gali karaan dacwadaha shareecada iyo Racfaanadooda.
4. Ma banaana Qareen inuu gallo dacwad ka dacwad ka duwan ta uu ruqsada u haysto.

### Qodobka 11aad
### CUSBOONEYSIINTA RUQSADA QARREENIMO.

1. Liisanka Ruqsada qareenimada waxaa la cusbooneysiinayaa sanadkasta Bilowgiisa.
2. Qareenku wuxuu ku bixinayaa cashuurta cusbooneysiinta Wasaarada Maaliyada, ka dibna wuxuu jiwanka lacag bixinta imanayaa Wasaarad Cadaaladda si ruqsadiisa logu cusbooneysiiyo.

### Qodobka 12aad
### SOO CELINTA RUQSADA QAREENIMO.

1. Qareen kastaa wuxuu Wasaarada ugu soo celinayaa ruqsadiisa si kumeel gaadh ah ama rasmi ah hadii uu galayo hawl aan la socon Karin ku shaqeysiga mihnadiisa qareenimo.
2. Qareenka ku soo celiya ruqsada si waafaqsan farqada 1aad ee qodobkan dib ayuu ka qaadanayaa ruqsadiisa markay ka dhamaato hawshii uu u soo celiyay.

### Qodobka 13aad
### ANSHAXMARINTA

1. Talaabooyinka anshaxmarinta ee soo socda, waxa awood u leh Guddiga ruqsad-bixinta & anshax marinta, waxana fulinaya Wasiirka Cadaaladda, marka uu helo go'aanka guddiga.

a. In dignin qoraal ah la siiyo
b. In la saaro ganaax aan ka badneyn 3,000,000SL. Sh ah
c. In laga hakiyo ruqsada mudo aan ka badneyn 1 sano.
d. In laga laalo ruqsad gabi ahaan.

### Qodobka 14aad
### HAKINTA IYO LAALISTA RUQSADA QAREENIMO.

1. Ruqsad qareenimo waxaa lagu laali karaa sababahan awgood :-
   a. Marka ay burto shuruud ka mid ah shuruudihii lagu siiyay.
   b. Markay cadaato inuu ruqsada ku helay khiyaamo ama been abuur.
   c. Markay cadaato inuu ruqsada ku shaqeystay iyadoo laga hakiyay.
2. Ruqsad qarenimo waxa lagu hakin karaa sababahan awgood:
   a. Hadday cadaato inuu galay dacwad aan ahayn kuwii ruqsada loo siiyay.
   b. haddii ruqsadda cusboonaysiin waayo muddo 2 sano ah, ama uu si hufan isaga bixin waayo cashuurta ku waajibtay.
3. anshax-marinta xeerkani tilmaamayo waxaa ka go'aan qaadanaya guddiga, haddii aanu fal dambiyeed culus ahayn. Kaas oo ay waajin tahay in guddigu u gudbiyo hay'adaha sharciga si loo horgeeyo maxkamadda awooda u leh.

### Qodobka 15aad
### Awoodaha Wasaaradda Cadaaladda

Wasaarada Cadaaladdu waxay leedahay awooda fulinta go'aanada Guddiga Ruqsad-bixinta iyo anshaxmarinta ay ka gaadhaan arrimaha anshax-marinta, diiwaangelinta iyo ruqsad-bixinta. Waxa kale oo ay Wasaaraddu awood u leedahay cusboonaysiinta ruqsadaha qareenada, markay soo dhamaystiraan shuruudaha cusboonaysiinta ee xeerkani tilmaamay.

**Qodobka 16aad**
**Guddiga Ruqsad-bixinta & anshax-marinta Qareenada**

1. Guddigu waxay ka kooban yihiin todoba xubnood, oo kala ah:
   a. Laba xubnood oo Wasaaradda Cadaaladda ah oo uu magacaabo Wasiirku labadii sanoba mar.
   b. Laba xubnood oo uruka qareenadu soo magacaabo labadii sanaba mar.
   c. Hal garsoore oo ka tirsan maxkamadda sare oo Gudoomiyaha Maxkamada Sare magcaabo.
   d. Laba Xubnood oo guddiga shuruucda ee labada Gole Baarlaman, oo ay soo magacaabayaan shirgudoonka labada Gole labadii sanoba mar.
2. Gudoomiyaha Gudigga waxa magacaabaya Wasiirka Cadaaladda waxanu u magacaabayaa xubin aan ka tirsanayn wasaaradiisa oo guddiga ka mid ah.
3. shirarka guddigu waxay qabsoomi karaan marka ay ka soo qayb galaan 5 xubnood oo guddiga ka mid ah.
4. Go'aanadooduna waxay ku meel marayaan cod hal dheeri ah. Haddii tirade codadku is le'ekaato waxa cod dheeraad ah yeelanaya gudoomiyaha.
5. Xoghayaha Guddigu waa agaasimaha Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda.
6. Guddigu waxay ku shaqaynayaan xarunta wasaaradda cadaaladda.
7. Guddiga waxa isugu yeedhi kara Gudoomiyaha Guddiga.

**Qodobka 17aad**
**Hawlaha & Waajibaadka Guddiga**

1. bixinta rukhsadaha, dejibta, qaadista imtixaanka qareenada, iyagoo natiijadana u gudbinaya Wasiirka Cadaaladda.
2. inay darsaan, baadhaan, hubiyaan eedaymaha lagu soo oogo qareenada.
3. inay go'aanadooda anshax-marinta qareenada ay ka gaadhaan u gudbiyaan wasiirka cadaaladda.

Qodobka 18aad
XILKA & WAAJIBAADKA QAREENADA

1. Waxaa ku waajiba fulinta iyo ku dhaqanka shuruucda dalka, Xeerkan iyo tilmaamaha lagu fulinayo (Regulation & Provision)
2. Inuu si daacadnimo iyo xilkasnimo ah ugu shaqeeyo aqoontiisa uguna adeego igmadihiisa.
3. Inuu si hufan u bixiyo khidmada iyo cashuurta sharciga ku waajibay

Qodobka 19aad
XUSHMADA QAREENKA.

1. Qareenku wuxuu ka qaadanayaa adeegyada sharci xushmad ku saleysan Hadba heshiiska dhexmara igmadaha iyo qareenka.
2. Heshiiska Igmadaha iyo Qaareenka waa Inay ku cadyihiin Macaga Qareenka oo Buux, nooca dacawadda iyo xushmadda.
3. Heshiiska ku Tilmaan faqradda hore, waa in laga diiwaan geliyo kolba Maxakamadda dacwaddu khusayso.

## Qodobka 20aad
## XUQUUQDA & DHAWRSANAANTA QAREENKA.

1. Xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadinimo ka sakow, wuxuu qareenku yeelanayaa xuquuqda muhiimada qareenimo
2. Qarennka lama xidhi karo, lamina xayiri karo hadii aan lagu qaban isagoo danbi culus faraha kula jira ( Flagrance) ama aan ogolaansho laga helin Guddiga ruqsad bixinta iyo anshax marinta qareenada.
3. Lama baadhi karo, lamana xayiri karo Xafiiskiisa, Gurigiisa, Qoraaladiisa & xidhiidhkiisa isgaadhsiineed, haddii aan amar sababeysan laga helin Garsooraha gacanta ku haya Dacwada la xidhiidha arrinta la baadhayo.

## Qodobka 21aad
## QAREENADA SHISHEEYE.

Iyadoo la tixgelinayo shuruudaha Xeerkani qeexayo, Dacwadaha ay dhinac ka yihiin dad ajanebi ah, qareeno shisheeye way uga doodi karaan Maxkamadaha Somaliland hortooda, oggolaanshahana waxa siinaya Wasaaradda Cadaaladda.

## Qodobka 22aad
## Ururka Qareenada

Qareenadu waxay samaysanayaan urur mihnadeedka Qareenada, waxayna ka diiwaangelinayaan Xeer ilaaliyaha Guud, markay dhamaystiraan shuruudaha urumimo.

## Qodobka 23aad
## XEER NIDAAMIYE.

Wasiirka Cadaaladdu wuxuu soo saarayaa Xeer nidaamiye lagu dhaqangelinyo Xeerkan.

## Qodobka 24aad
## BURIN.

1. Waxaa la buriyay dhamaan xeer kasta oo ka hor imanaya ama aan la socon Karin xeerkan
2. Marka xeerkani dhaqangalo waxa buraya dhamaan ruqsadihii qareenimo ee hore u jiray.

## Qodobka 25aad
## DHAQAN GAL.

Xeerkani, Wuxuu dhaqangelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha JSLand.

**Allah Mahad Leh**

**Maxamed Xuseen Cisman**
**Xoghayaha Guud, G/Wakiilada**

**Axmed Maxamed Adan**
**Gudoomiyaha G/Wakiilada**